



WAXA LOO BAAHAN YAHAY INAAD KA TAQAANID DEGDEGGA NUKLEERKA AMA KAAHA

Waa maxay degdegga nukleerku ama kaahu?

Degdegga ama aafada nukleerku waxay dhacdaa marka alaab nukleer ama kaah lihi qaraxdo. Waxa qaraxyadaasi keeni karaan iftiin indho-daraandar leh, kulayl, dab, iyo kaah halis ah.

Degdegga kaaha waxa ku jiri kara shil ka dhacay warshad koronto oo nukleer adeegsata. Waxa kale oo keeni kara qaraxa “bombo/bambaane wasakhaysan.” “Bombada/Bambaanaha wasakhaysani” waa wax qarxaya, sida dhinamite oo kale, oo ay ku jiraan waxyaabo leh kaah halis ah.

Maxaan sameeyaa *mudada* u jiro aafada ama degdeg nukleer ama kaah halis ahi?

Madaxda gobolka iyo degmada ayaa la socon doona tirada kaaha halista ah ka dibna go'aan ka gaadhi doona wixii la sameyn lahaa. Wixii fariimo ah ka dhageyso raadhyowga, telefishanka, ama habka digniinta degdegga loogu talagalay. Haddii loo baahdo, diyaar ha kuu ahaado raadhyow baytari leh. Saraakiisha ayaa kuu sheegi doona in loo baahan yahay inaad gudaha joogtid ama ka baxdid gurigaaga. Haddii lagu sheego inaad sii joogtid gurigaaga:

- Xidh, handaraabna dhamaan albaabada iyo daaqaha.
- Bakhtii dhamaan qalabka hawada keena. Waxa taa ku jira foornooyinka, hawo qaboojiyeyaasha, iyo marawaxadaha.
- Joog qol aan lahayn daaqado. U hubso aad in meel ku filan u haysid qof kasta oo qolka jooga.

Aafada ama degdegga nukleerka ama kaaha ma ku jiran doonaa?

Bombada/bambaanada wasakhaysani ma laha kaah ku filaan inaad ku jiratid. Halista weyni waxay ka imanaysaa qaraxa. Laakiin, qarax weyn oo ah nukleer waad ku xanuunsan kartaa. Inta ay kaaga soo baxaan calamadaha jiradu waxay qaadan kartaa dhawr saacadood ilaa dhawr cisho. Dadka qaarkii iskuma arkaan wax calaamadaha ah. Calamadaha ugu badan waxa ka mid ah:

- Harraga/maqaarka oo casaada
- Dareen jiro ama matag
- Madax xanuun
- Dareen ah daal
- Shuban
- Af xanuun ama dhiig ciridka ka yimaada

Haddii aad jiratid ama xanuunsatid, isla markiiba la hadal dhakhtarka.

Maxaan sameeyaa aafada ama degdeg nukleer ama kaah halis ah *ka dib*?

Haddii aanad u dhaweyn meesha qaraxu ka dhacay, waa inaad gudaha gashid, wixii fariimo ahna ka dhageysatid raadhyowga, telefishanka, habka digniinta degdegga. Haddii aad u dhawdahay barta qaraxa isla markaana aan dhaawac ku soo gaadhin, waa inaad:

- U lugeysid daarta/sarta kuugu dhow gudahana gashid. Joogista guduuhu waxay kaa yareyn doontaa soo-gaadhista maadada leh kaaha halista ah.
- Iska saar dharka iyo kabaha wakhtiga ugu dhakhsaha badan kuna rid bac ama boorso caag ah. Xidh bacda ama boorsada.
- Maydho/qubeyso ama haragga u dhaq sida ugu wacan ee aad awoodid adiga oo isticmaalaya saabuun iyo biyo.
- Dhageyso warka ku saabsan wixii la sameyn lahaa.

Ready in 3 (Diyaar ku Noqo 3 talaabo) waa barnaamij loogu talagalay degdeg-u-diyaarsanaanta Missouri dhexdeeda. Waxa barnaamijka soo qabanqaabiyay Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Waayeelka ee Missouri. **Ready in 3** waxa loogu talagalay in dadka iyo beelaha lagaga caawiyo diyaar u-noqoshada noocyo badan oo ah degdegga ama aafayinka sida duufaanada ilaa argagaxisada. Wixii war dheeraad ah, u booqo [health.mo.gov/emergencies/readyin3](https://www.health.mo.gov/emergencies/readyin3).